

# Deeqaha waxay kor u qaadaan isdhhexgalka dhaqamada kala duwan oo waxayna la dagaallamaan takoorka.

Nofeembar 04, 2024 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Codsiyada ayaa furmaya Nofeembar 4 ee barnaamijyada deeqaha dhaqamada kala duwan iyo kuwa la dagaallanka cunsuriyadda ee Alberta si loo taageero mashaariicda bulshada ku saleysan ee xusaya kala duwanaanshaha Alberta oona la dagaallamaya cunsuriyadda.

Bulshooyinka dhaqamada kala duwan ee Alberta waa mid ka mid ah waxyaabaha badan ee ka dhigaya gobolka meel wanaagsan oo lagu noolaado, lagu shaqeyyo, laguna kori karo qoys. Ilaa \$13.5 milyan doolar oo muddo saddex sano ah ayaa loo qoondeeyay in lagu caawiyo ururada bulshada iyo bulshooyinka asaliga ah si ay u dhiirrigeliyaan qiimaha iyo faa'iidada isdhhexgalka dhaqameed iyo isku xirka dhaqamada kala duwan iyada oo loo marayo laba barnaamij oo deeqo ah.

"Dowladdeena waxaa ka go'an tahay inay la shaqeysa bulshooyinka si loo dhiirrigeliyo loona kobciyo ixtiraamka iyo ka mid noqoshada dhammaan dadka reer Alberta, iyada oo aan loo eegin asalka dhaqameed ama meesha ay ka soo jeedaan. Deeqahan waxay taageerayaan mashaariicda ay bulshada maxalliga ahi wadaan oo sharaf u ah bulshooyinka kala duwan iyo bulshooyinka asaliga ah iyo Métis ee Alberta, taasoo ka caawinaysa in la dhiso bulsho adag oo midnimo leh."

*Muhammad Yaseen, Wasiirka Socdaalka iyo Dhaqamada Kala Duwan*

## Barnaamija Deeqaha Dhaqamada Kala Duwan

Barnaamija Deeqaha Dhaqamada Kala Duwan ee Alberta wuxuu leeyahay laba qaybood oo lagu taageerayo mashaariicda ay bulshada hogaamiso ee dhiirrigeliya kala duwanaanshaha dhaqameed ee Alberta oo kor u qaada ka mid noqoshada, oo ay ku jiraan taageeridda ururada

bulshada asaliga ah si ay u dabaaldegaan oo ay ula wadaagaan dhaqankooda hodanka ah iyo hidaha.

- Qaybta 1 waxay bixisaa ilaa \$50,000 doolar mashaariicda abuuraysa fursado isku xirka dhaqamada kala duwan ee kooxaha dhaqameed iyo kuwa asaliga ah.
- Qaybta 2 waxay bixisaa ilaa \$15,000 doollar mashaariicda abuuraysa fursado lagu xuso kala duwanaanshaha.

## Barnaamija Deeqaha La Dagaallanka Takoorka

Barnaamija Deeqaha La Dagaallanka Cunsuriyadda ee Alberta wuxuu leeyahay laba qaybood oo lagu taageerayo mashaariicda ay bulshada hogaaniso ee gacan ka geysanaya wax ka qabashada iyo ka hortagga cunsuriyadda iyo kor u qaadista bulshooyin kala duwan oo ku salaysan isdhexgal iyo aqbalaad oo dhan Alberta.

- Qaybta 1 waxay bixisaa ilaa \$5,000 doollar mashaariicda kor u qaada wacyiga iyo saameynta cunsuriyadda ee ay la kulmaan kooxaha asaliga ah iyo kuwa midabtakoorka la kulma.
- Qaybta 2 waxay bixisaa ilaa \$10,000 doollar si loo taageero mashaariicda la dagaallanka cunsuriyadda ee ay bulshada hogaaniso.

Gu'gan la soo dhaafay, Barnaamija Deeqaha Dhaqamada Kala Duwan wuxuu taageeray 182 mashruuc iyadoo la siiyay wadar ahaan \$5.1 milyan doollar si loo hirgeliyo barnaamijyo kordhiya wacyiga dhaqamada kala duwan, halka 49 mashruuc oo la dagaallanka cunsuriyadda ahna ay heleen wadar ahaan \$424,000 doollar oo deeq ah iyada oo loo marayo Barnaamija Deeqaha La Dagaallanka Cunsuriyadda.

## Xogta la xiriirta

- [Alberta.ca/ethnocultural-grant](http://Alberta.ca/ethnocultural-grant)
- [Alberta.ca/anti-racism-grant](http://Alberta.ca/anti-racism-grant)

## Weydiimaha warbaahinta

### **Neil Singh**

780-644-2212  
Xoghayaha Warfaafinta, Socdaalka iyo Dhaqamada Kala Duwan